

KA QAYB QAATAYAASHA SNAP FIRO GAAR AH YEESHA

Waxda Adeegyada Dadweynaha Oregon waxay adeegyada degdega ee SNAP oo dheeraad ah siinaysaa qoysaska SNAP oo badan si looga caawiyo in ay gataan cunto inta lagu jiro dhibaatooyinka cudurka baahsan ee COVID-19. Congress-ka ayaa oggolaaday gargaarada gaarka ah ee SNAP oo dheeraad ah isaga oo jawaab u ah cudurka baahsan.

Miyaan heli doontaa gargaarada SNAP oo dheeraad ah?

Haddii gargaarkaaga SNAP ee bishii uu ka yar yahay gargaarada SNAP ee ugu badan ee loogu talagalay qoyskaaga, waxaad heli doontaa gargaaro dheeraad ah oo gaaraya ilaa cadadka gargaarada SNAP ee ugu badan oo loogu talagalay tirada qoyskaaga. Haddii aad isla hadaba hesho gargaarada SNAP ee ugu badan ma heli doontid gargaarada SNAP oo dheeraad ah. Tani waxaa u sabab ah iyada oo ay go'aanka gaartay dowladda federaalku, ee aysan ahayn DHS.

TUSAALOOYINKA

| Heli doona Gargaar Dheeraad ah | Aanu jirin Gargaar Dheeraad ahi |
|---|---|
| Goysku wuxuu helayaa \$200/bishii oo SNAP ah oo loogu talagalay hal qof oo weyn iyo 2 carruur ah. Qoyskani wuxuu heli doonaa gargaarada SNAP oo dheeraad oo dhan \$335 - kaasi oo kordhinaya gargaarada SNAP kana dhinaya \$535 (ugu badnaan loogu talagalay qoys 3 qof ka kooban). | Goyska B wuxuu helayaa \$535/bishii oo SNAP ah oo loogu talagalay hal qof oo weyn iyo 2 carruur ah. Qoyskani MA heli doono wax gargaarada SNAP oo dheeraad ah, sababta oo ah waxay isla hadaba helayaan gargaarada ugu badan oo loogu talagalay qoys 3 qof ka kooban. |
| Gofka A wuxuu helayaa \$16/bishii oo SNAP ah. Gofkani wuxuu heli doonaa gargaaro dheeraad ah oo dhan \$188 - kaasi oo kordhinaya gargaarada SNAP kana dhinaya \$204 (ugu badnaan loogu talagalay qoys 1 qof ka kooban). | Goyska B wuxuu helayaa \$204/bishii oo SNAP ah. Gofkani MA heli doono wax gargaarada SNAP oo dheeraad ah, sababta oo ah wuxuu isla hadaba helayaa gargaarada ugu badan oo loogu talagalay qoys 1 qof ka kooban. |

| Tirada qoyska | SNAP Ugu badan \$ |
|----------------------------|-------------------|
| 1 | \$204 |
| 2 | \$374 |
| 3 | \$535 |
| 4 | \$680 |
| 5 | \$807 |
| Xubin kasta oo dheeraad ah | +\$153 |

Sidee baan ku ogaanayaa tirada gargaarada SNAP ee aan helayo iyo haddii aan helayo gargaarada SNAP oo dheeraad ah?

DHS kuuma soo diri doonto ogeysiin haddii aad hesho gargaarada SNAP oo dheeraad ah Fiiri lacagta kuu hartay iyo lacagtaada gargaarka SNAP ee bishii marka la gaaro:

Wac Lambarka Adeega Macmiilka ee EBT si aad u hubiso lacagta kuu hartay: 888-997-4447 (lambarka ku yaala dhinaca dambe ee kaarkaaga EBT) ama booqo ebtedge.com

Haddii aan u qalmo gargaarada SNAP dheeraad ah, goorma ayaan heli doonaa?

Qoysaska u-qalma ayaa ka heli doona toddobada lacag-bixinno ee adeegyada degdegga ah ee SNAP kaarkooda EBT bisha Abriil, Maajo, Juun, Luulyo, Ogast, Sebtember, iyo Oktoobar 2020.

Bishii Abriil, Maajo, Juun, Julaay, Ogast, iyo Sebtember, lacagaha dheeraadka ah ee SNAP ayaa lagu shubay kaararka.

Bisha Oktoobar 12, lacagaha dheeraadka ah ee SNAP ayaa sidoo kale la sameyn doonaa.

Codsadayaasha cusub ee SNAP ama qoysaska ka

Maxaa dhacaya haddii aanan helin SNAP?

Haddii aad tahay qof dakhligiisu hooseeyo waxaanu kugu dhiirigelinaynaa in aad codsato. Haddii lagu oggolaado adeegyada, waxaa dhici karta in aad sidoo kale u qalanto lacagta dheeraadka ah ee SNAP. Si aad u codsado:

Booqo oregonhunger.org/apply-for-snap ama wac 2-1-1

